



# Hagaha Bilowga ee Degdegga ah ee Codsashada Caymiska Caafimaadka

## CAYMIS HEL. CAYMIS KU SII JIR.



### 1 SOO URURI MACLUUMAADKAAGA

Ka hor inta aadan bilaabin codsigaaga, soo ururi macluumaadka hoose ee loogu talagalay dhammaan xubnaha reerka ee codsanaya caymiska.

- Magacyada sharciga ah
- Taariikhaha dhalashada
- Lambarada Damaannada Bulshada
- Dakhlige ka hor canshuuraha/ka-jarisyada
- Xaaladda xareynta canshuurta(tani waa waxa aad ku soo sheegto canshuur celintaada IRS)
- Caddeynta dakhliga (haddii dakhligaagu uu isbeddelay tan iyo markii ugu dambeysay ee aad canshuur xareysay)
- Macluumaadka caymiska caafimaadka ee hadda (taariikhaha caymiska, lambarka kooxda, lambarada siyaasadda)
- Caddeynta xaaladda socdaalka haddii aad tahay qof si sharci ah u deggan
- Caddeynta xaaladda qabiilka haddii aad tahay Hinddida Mareykanka/Qof Asal Ahaan u dhashay Alaska oo diiwaangashan

Hubso in aad ku darto dhammaan xubnaha reerka, xitaa haddii aysan caymis u baahnayn. Macluumaadkan wuxuu nagu caawinaya go'aaminta haddii aad xaq u leedahay caymis caafimaad bilaash ah ama qiimahiisu yar yahay.



### 2 MA U BAAHAN TAHAY CAAWIMAAD?

Waxaad caawimaad bilaash ah, qof ahaan ah aad ka heli kartaa hagaha ama dallaalka. Waxay kugu caawin karaan buuxinta codsiga iyo in aad isku qorto caymiska.

Waxaad sidoo kale ka waci kartaa Xarunteenna Taageerada Macmiilka 1-855-923-4633 si lagaaga caawiyo hannaanka codsiga.



### 3 CODSO

Marka aad diyaar u tahay in aad codsato, koonto ka sameyso *Washington Healthplanfinder*. Isticmaal macluumaadka aad soo ururisay si aad u buuxiso codsiga.

Ka-dib marka aad codsigaaga soo gudbiso, waxaad oggaan doontaa haddii aad xaq u leedahay Qorshaha Caafimaadka U-qalma, canshuur dhaaf, ama caymiska bilaashka ah ee Washington Apple Health.



### 4 QORSHE DOORO

Raadi qorshe ku habboon miisaaniyadaada iyo baahiyadaada.

Dhagsii "Bixiyaha Daryeelka Caafimaadka/Health Care Provider" si aad u raadiso qorshayaal uu takhtarkaaga ku jiro shabakada.

Habee raadintaada adiga oo qorshayaasha u kala shaandheynaya lacagta joogtada ah ee caymiska, lacagaha caymiska laga jari karo, lacagta ugu badan ee jeebka laga bixiyo, shirkadda caymiska, heerka birta, iyo in badan. Hal mar isbarbardhig ilaa iyo saddex qorshayaal.



### 5 WAAD CAYMISAN TAHAY

Marka aad soo gebogabeyso qorshahaaga oo aadna bixiso qaansheeggaaga koowaad, waxaad macluumaad ka heli doontaa shirkadaada caymiska oo ku saabsan caymiskaaga cusub.

Hel Caawimaad Qof Ahaan Ah

## WAPlanfinder

MACLUUMAADKA CAYMISKA OO DEGDEG AH

ADEEGSO APP-KA TELEFOONKA GACANTA SI AAD U HESHO CAAWIMAAD QOF AHAAN AH OO KUU DHOW



[wahealthplanfinder.org](http://wahealthplanfinder.org)

1-855-WAFINDER

1-855-923-4633

